Gacaliye/Gacaliso[Insert Parent Name],

Macallinka Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) ahaan, waan qiimeeyaa shaqada si loo abuuro jawiga waxbarasho oo wanaagsan oo loogu talagalay ardaydeena.

Doorkayga macallin ahaan waa in aan u doodo baahiyaha ardaydeeda waana wax aan si dhab ah u qaato.  Ma rabo in aan lumiyo hal maalin oo wax la barayo ardaydeena, laakiin uma dulqaadan karo wareeg miisaaniyad dhimis ah oo kale.

Sida aad ogtahay, PPS waxay xiraysaa dugsiga maalinta Arbacada ah, Maajo 8-deeda sababta oo ah kumanaan ka tirsan macallimiinta sida aniga oo kale ah ayaa isku imaanaya si ay isku garab istaagaan ardaydaada isla markaana indhaha dadka ugu soo jeediyaan baahida jirta si hab buuxda loogu maalgeliyo dugsiyadeena.   Dhacdadan qoyska u wanaagsan waxay yeelan doontaa hawlo bilaabmaya 8:30 subaxnimo oo uu soo raaco isku imaatin 11 subaxnimo ka dhacaysa Tom McCall Waterfront ee yeelanayaan macallimiinta, waalidiinta, iyo ardaydu.

30-kii sano ee la soo dhaafay, Oregon waxay kharash gareysay wax aad uga yar qiyaasta qaranka marka la eego ardaygiiba, taasi oo keentay tirada ardayda fasalka oo badan, hoos u dhac ku yimid waqtiga wax barista iyo in la jaro waxbarashada jirka, farshaxanka, tababarka iyo fasallada muusikada.  Sanad kasta, macallimiinta ayaa laga codsadaa in ay qabtaan shaqo badan oo dheeraad ah iyaga oo haysta kheyraad yar. Tani waxay saameyn dhab ah u leedahay carruurteena.

Haddii aad jeclaan lahayd in aad waxyaabo dheeraad ah ka ogaato dhacdadan qoyska u wanaagsan si aad u gaarto go'aan laga warqabo oo ku saabsan haddii aad rabto in aad ka qayb qaato, fadlan riix halkan: [https://may8forstudents.org](https://may8forstudents.org)

Best,

Magaca Macallinka